

WARGELINTA BILAA TAKOORKA

Hay'ada Vermont ee Khayraadka Dabiiciga ah (Vermont Agency of Natural Resources, ANR) waxa uu ka shaqeeyaa barnaamijyada, adeegyada, iyo hawlaha isaga oo aan cidna ku takoorin qoomiyada, diinta, waxa uu aaminsan yahay, midanka, meesha uu kasoo jeedo (oo uu ku jiro aqoonta Ingiriisiga), cida uu kasoo jeedo, meesha uu ku dhashay, laxaad la'aan, da'da, xaalada guurka, jinsiga, rabitaanka jinsiga, aqoonsiga jinsiga, ama naas nuujin (hooyada iyo ilmaha). Uma dul qaadanayno wixii takoor, caga juglayn, hanjabaad, cidhiidhi gelin, ama aar goosi lagula kaco shakhsiyaadka ama koox maadaama oo ay xuquuqdooda doonteed uu u ilaalinayo sharciga federalka ama gobolku.

SU'AALO AMA CABASHO?

Hadii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan wargelinta ama barnaamijyada bilaa takoorka ANR, ama hadii aad aaminsan tahay in lagaa takooray barnaamijka ama hawl ANR, waxa aad la xidhiidhi kartaa:

Joanna Pallito, Agaasimaha Adeegyada Maamulka iyo Isku Duwaha Bilaa Takoorka

Vermont Agency of Natural Resources, Department of Environmental Conservation (Warda Ilaalinta Deegaanka)

Davis Building – 1st Floor
One National Life Drive
Montpelier, VT 05620-0301

joanna.pallito@vermont.gov

(802) 490-6238

ADEEGYO LUUQADA AH OO BILAASH AH: Hadii aad ku hadasho luuqad aan Ingiriisi ahayn, waxa aanu bixinaa kaalmo luuqadeed oo bilaash ah. La hadal **802-490-6238**.